SOMALI

Wadajir Wada-Shaqaynta

Ku Guulaysiga Cilmiga Ardayda oo Dhan



Buuga War-bixinta
Dugsiyadda Dadweynha Seattle,
Waalidiinta iyo Jaaliyadaha

Buuga war-bixinta waxaa soo diyaariyey Dugsiyadda Dadweynha Seattle kuna qoran yahay Luqooyinka soo sodo:

- Amharic
- Cambodian
- Chinese
- Lao
- Somali
- Spanish
- Tigrigna
- Vietnamese

© Community Training and Assistance Center, 2005
Boston, MA

Iska kaashtay si wadajir ah:
The Family Support Worker Program
Seattle Public Schools
Seattle, WA

Waxaa bixiyey Maalgalinta:
U.S. Department of Education
Fund for the Improvement of Education

Arday kastaba Waa in oo ku Guulaystaa Cilmiga

Buugaan war-bixinta wuxuu kuu soo bandhigayaa hogaaminta waalidka, shaqaalaha dugsiga iyo ururada jaaliyadaha oo xiisaynayaa in ay cawinaano ku guulaysashada cilmiga ardayda.

Waalidka,[1] dugsiyadda iyo ururada jaaliyadaha[2] waxay leeyihiin habab kala duwan oo ardayga ku guulaysanayaan. Mid kastaba wuxuu leeyahay qodob akhbaaro muhiim ah oo laga rajaynaayo. Wadajir ahaan, waxaynu dhameeystirayaan qaabka gargaarka waxbarashada ardayda.

Wadajir u shaqaynta, dugsiyada, ururada jaaliyadaha iyo qoysaska waxay abuuri karaan:

- Rajooyin sare dhamaan ardayda,
- Daryeelid, cawinaad waxbarashada deegaanada dugsiga, guriga iyo jaaliyadaha,
- Barnaamij waxbarasho tayo sare leh oo ku haboon khayraad iyo ashyaaada, shaqaalo leh xirfadaha wax barida iyo in la siiyo cawinaada waxbarashada ardayda u baahan yihiin, iyo
- Xariirinta wax-tarka dadaalka koox waxbarshada (ardayda, dugsiyadda, qoysaska iyo jaaliyada).

Wada-qaybsiga akhbaaraha, weydiinta su'aaladaha iyo helitaanka xalinta dhibaatada waxay yihiin tilaabadaha muhiimka u ah waalidka-dugsiga-jaaliyada si wadajir u cawini lahaayeeyn ardayda ugu guulaysantaa horumarka cilmiga ubad kasto iyo dugsi kasto.

[1] Erayga **"waalidiinta"**kana mid ah xanaaneeyaha ama wakiilada, waalidka ilmo kale haayo, iyo awoowaha ama ayeeyada.

[2] **"Ururada Jaaliyada"** waa dowlada, hay'adaha madaxbaan faa'iidooyinka, iyo kooxyaha ku saleeysan diinta oo cawino qoyska iyo ardayda ay ku guulaysa hababka kala nooca ah. Tusaale, xarunta qoyska, xarunta dariska, hay'adaha u adeego bulshada, ururada dhalinyarada, isbahaysiga waalidka, kaniisadaha, iyo ururada kale oo bixiyo barnaamijka howlaha jaaliyada.

Buugaan wuxuu ka kooban yahay siddeed cutub oo la xariirka ku guulaysiga cilmiga ardayda. Cutub kastaba, waxaa lagu siinayaa akhbaaro muhiim ah. Cutubyada waxaa loo isticmaali karaa bilaawga xeeladaha wada-xariirinta ka dhaxeeyso waalidka, shaqaalaha dugsiga iyo ururada jaaliyadaha. Buugaan wuxuu kaloo ku siinayaa khayraad muhiim ah iyo dad aad la xariirto

Cutubyada	Bu'gga
1. Soo Dhaweeynta Dhismayaasha Dugsiga, Goob Wax barasho nabad leh	3
2. Fasalo Wax lagu Baranaayo	5
3. Kaarka War-Bixinta iyo Horumarinta War-Bixinada	6
4. Heerka Imtixaanada	7
5. Qorshaha Waxbarashada Shaqsi-ahaan Ardayda	9
6. Barnaamijyada Cawinaayo Ardayda	11
7. Hagaajinta Dugsiga Degmadda	13
8. Su'aaladaha iyo Khusaynta	15

Khayraadka iyo Dadka La Xariirka	Bu'gga
Muraajacadda "No Child Left Behind (NCLB)"	1
Siyaasada Isbahaysiga Qoyska ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle	16
Khayraad Dheeraad ah	17

Fadlan la qaybso dadka kale akhbaaraha buugaan, fikradahaada iyo talooyinka kale.



MURAAJACADDA “NO CHILD LEFT BEHIND (NCLB)”

NCLB waa qodob sharciga waxbarasho oo qaranka ah. Ujeedada NCLB waxay tahay in dhamaan caruurta “in ay helaano fursado waxbarasho cadaalad ah, loo siman yahay iyo aqoon tayo sare.” NCLB, dugsiyada dadweynaha waa in ay soo bandhigaan horumarka cilmiga ardayda. Dugsiyada waa in ay leeyihiin macalimiin tayo fiican oo soo bandhigi karo in ay yihiin macalimiin nabadgalyo leh.

NCLB wuxuu siinayaa waalidka iyo jaaliyada in ay xaq u leeyihiin helitaanka akhbaaraha ku saabsan horumarka ardayga iyo dugsiyada, waxayna kaloo xaq u leeyihiin ka soo qaybgalka qorshaha iyo xalinta dhibaatooyinka. NCLB wuxuu ku adkaynayaa si wadajir u wada-shaqaynta dugsiyada, waalidka iyo guud ahaan jaaliyadaha arimaha ku saabsan waxbarashada caruurta iyo hagaajinta dugsiyada iyo Dugsiyada Degmaayinka.

Qodobka sharciga ee NCLB Act, waxaa ogolaaday Xubnaha Barlamaanka U.S. 2002, hadda waxaa lagu fuliyaa Dugsiyada Dadweynaha Seattle iyo nawaaxi kale oo dalka ah. Waxaana soo raacaayo qaar ka mid ah fulinta iyo qodobada looga baahan yahay NCLB.

Horumarka Ardayga	• Ardayda dugsiyada dadweynaha waa in ay qaataano imtixaanka heerka si loo cabiro waxa ardayda bartaano. • Natiijada waxaa laysku bar-bardhigayaa dugsiga iyo qiyaasta horumarinta sanadka. • Dugsiyada Gobolka Washington waxay isticmaalayaan imtixaanka WASL. Dugsiga wuxuu kaloo isticmaalayaa qiyaasta horumarka gaarka ka mid ah ardayda curyaanka. • Dugsiyada waxay qaybinayaan natiijada imtixaanka shaqsiyaadka ardayga waalidiinta iyadoo cadeeynaayo cilmiga ardayda gaarka ah u baahan yahay.
Tayada Macalinka	• Dhamaadka sanad dugsiyeedka 2005-2006, dhamaan macalimiinta dhigayso maadooyinka cilmiga waa in ay leeyihiin tayo sare. • Macalinka leh tayo sare waa kan ah shahaadada maclinnimada buuxdo, shahaadada bajulaarka, iyo in soo bandhigo in aqoon u leeyahay maadada oo dhigaayo.
Fulitaanka Howlaha Dugsiga	• Sanad kastaba, degmadda waa in ay siiyaan una diyaariyaan waalidka iyo jaaliyada akhbaaraha ku saabsan dugsiga aqoon gaarista iyo kaarka war-bixinta hay’ada macalimiinta. • Goorta dugsiga aqoontiisa hoos u dhacdo iyo horuamr la’aan labo sano ama in ka badan: – Dugsiga degmadda waa in ay soo ogaysiiyaan waalidka una fasiraan sida ugu qaybgali lahaayeen dadaalka hagaajinta dugsiga. – Haddii dugsiga sii wado in oo horumar sameeynwaayo sanadka seddexaad. Ardayda waxay xaq u leeyihiin in ay helaano cawinaad kordhinta cilmiga (Supplemental Educational Services). – Waalidiinta waxaa la siinayaa ikhtiyaarka in ardayda loo badali karo dugsiyada aqoonta sare.
Nabadgalyada Dugsiga	• Akhbaaron nabadgalyada dugsiga iyo isticmaalka mukhaadaraadka oo ururiyey gobolka, waa in oo diyaar u yahay waalidka, dugsiga iyo hogaamiyaasha jaaliyada. • Waalidiinta caruurtooda oo ay yihiin dhibanayaal dambi lagu dhibaateeyey dugsiga ama dhiganaayo “joogtaynta khatar dugsiga“ waxaa la siinayaa doorashada dugsiga kale.
Hagaajinta Dugsiga	• Degmada waxaa looga baahan yahay in waalidiinta ka qaybgalaano qorshaha lagu hagaajinaayo waxbarashada dugsiga gaar ah iyo qorshaha dib u habeeynta qaabka waxbarashada dugsiga.

1. SOO DHAWEEYNTA DHISMAHA DUGSIGA, GOOB BARITAAN NABADGALYO LEH

Booqashada Dugsiga

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxaa lagu dhiiragalinayaa waalidiinta iyo ururada in ay ka qaybgalaano fasalka, waxqabadka dugsiga iyo shirka maalgalinta-dugsiga. Waalidka waa lagu soo dhaweynayaa in ay daawadaan waxqabadka fasalka taas oo jadwalka horay looga sameeysto. Waalidiinta iyo dadka kale oo soo booqanaayo waa in ay ka soo galaano xafiiska weyn goorta ay yimaadaan dhismaha dugsiga.

Nabadgalyada iyo siyaasadaha Akhlaaqda

Dugsi kastaba wuxuu leeyahay nabadgalyo iyo siyaasadaha akhlaaqda sida haboon, goobta si loo hubiyo waxbarashada. Waxaa ka codsan kartaa koobiga xafiiska weyn dugsiga. Waalidiinta, shaqaalaha dugsiga iyo hogaamiyaasha jaaliyada si ay u fahmaano qodobada siyaasada iyo/ama siinta talooyinka hagaajinta.

Qodobka qaranka No Child Left Behind (NCLB) Act waxaa looga baahan yahay akhbaaraha ay la qaybsadaan waalidiinta iyo xubnaha jaaliyada oo ku saabsan nabadgalyada dugsiga iyo ardayda isticmaasho mukhaadaraadka si ay ula shaqayaan dugsiyada si loogu yareeyo dhibaatadaas.

Qodobada Naseexada

- **Waalidiinta, shaqaalaha dugsiga** iyo **xubnaha jaaliyada** waa in la tixgaliyo dhaqanada kala nocc isla markaana looga faa'iidaystaa waayo-aragnimada iyo xirfadaha gaarka ah oo kala duwan.
- **Dugsiyada:**
  - In la siiyo dhacdooyinka dhamaan qoysaska kana mid ah furitaanka dugsiga ama habeeynta u soo laabashada dugsiga.
  - Bixinta xanaanada caruurta iyo turjubaano luqadooda.
  - In la siiyo goobo ay ku shiraano waalidiinta iyo/ama ururo jaaliyada si ay ula shaqeeyaan shaqaalaha dugsiga iyo ardayda.
  - Mararka qaarkood waa in lagu qabtaa shirarka goobaha jaaliyadaha si qoysaska ugu sahlanaato ka qaybgalkooda.
  - Dhiiragali dhaqanada kala jaadka ah shaqada waxbarashada, dabaal-daga iyo cimilada dugsiga.
- **Waalidiinta iyo dugsiyada** waa in ay yaqaanaan sida layskula xariiri lahaa xaaladaha deg-dega ah.
- **Waalidiinta** waa in ay yaqaanaan goobta istaaga baska iyo/ama wadda socodka nabadgalyada udabadkooda.
- **Waalidiinta**a iyo **shaqaalaha dugsiga** waa in ay ka doodaan si wadajir ah xalinta dhibaatada nabadgalyada iyo akhlaaqda quseeyo.

Talooyin kale:

- _____
- _____

2. BARASHADA FASALKA

Waxbarashada Ardayga

Waalidiinta, shaqaalaha dugsiga ama ururada jaaliyada waxay si fiican u cawini karaan ardayda haddii ay yaqaanaan waxbarashada fasalka ardayga laga rajeeynaayo.

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay abuurayn ***heerka aqoonta*** oo fasiraayo wax ardayda *maxay* u baahan yihiin innay bartaan ee maado kasto cilmiga ah oo helo *fasal kastaba*. Heerka waxbarashada waa in oo la kulmaa xeerka gobolka iyo kan degaanka dowladda u baahan yihiin. Waxaa koobiga heerka waxbarashada ama wixii su'aalado ah weydiin kartaa macalinka ama maamulaha dugsiga ama waxaa akhri kartaa goobta shabakada Dugsiga Dadweynaha Seattle heerka waxbarashada maado kasto oo leh heerka fasalada www.seattleschools.org/area/acastan/index.dxml

Qodobada Naseexada

- **Dugsiga** ku martiqaad waalidiinta in ay soo booqdaan fasalka
- **Waalidiinta** dugsiga si aad u ogaato macalinka wuxuu baraayo iyo in aad aragto shaqada ardayda.
- **Waalidiinta iyo macalimiinta** waxay ka falanqoonyaan ardayda waxa laga rajeeynaayo in ay bartaano iyo habka ugu fiican ardayda kastaba wax ugu baranaayo dugsiga hanuunintiisa, shirka waalidiinta-macalinka iyo/ama shirarka kale.
- **Waalidiinta iyo ururada jaaliyada** in ay siiyaano goobo aamusan ardayda ugu shaqeeyo shaqada guriga.
- **Waalidiinta** weydii ardayda waxa ay fasalka ay ku shaqeeynayaan (ugu yaraan hal jeer todobaadkii) muraajacad ku sameey buuggaadka iyo ashyaada ardayda isticmaalaan.
- **Macalimiinta** akhbaargalinta qorshaha xiliga simistarka ama sanadka ardayga, waalidka, iyo jaaliyada iskaashiga wadajirka kale oo ku saabsan wax-qabadka, mashaariicda, iyo shaqada guriga.
- **Waalidiinta iyo ururada jaaliyada** weydii shaqaalaha dugsiga maxay kaa cawin karaan waxbarashada ardayda.

Talooyin kale:

- _____
- _____

3. KAARKA WAR-BIXINTA IYO KAARKA HORUMARINTA

Horumarinta Ardayga

Dugsiyada Dadweynaha Seattle wuxuu siinayaa dhamaan waalidiinta war-bixinta horumarka ardayga si qaab ah foomka kaarka war-bixinta iyo/ama horumarka war-bixinta sanadkii dhoor jeer. Macalimiinta waxay go'aansanayaa ardayga wuxuu sameeynaayo oo ku fiican yahay fasalka iyadoo sal-dhig looga dhigaayo imtixaanka, shaqada guriga, mashruuca iyo waxqabadka fasalka.

Siyaasada Dugsiyada Dadweynaha Seattle wuxuu sheegayaa ardayda waa in ay u dalacaan fasaka ka sareeyo fasalkooda goorta ay gaaraano aqoonta looga baahan yahay fasalkii ka horeeyey.

Qodobada Naseexada

- **Dugsiyada** waa in ay siyaan kaarka war-bixinta ama horumarka war-bixinta oo qeexaan waalidkana fahmaan karaano. Waxaa lagu turjubaano goorta loo baahdo.
- **Waalidiinta** waa in ay yaqaanaan kaarka war-bixinta jadwalka iyo goorta la helaayo.
- **Macalimiinta** waxay diyaar u yihiin in ay ka jawaabaano su'aaladaha. Waa in ay kala doodaan kaarka war-bixinta waalidiinta.
- **Waalidiinta** waa in ay soo wacaan ama ay yimaadaan dugsiga haddii ay qabaano wax su'aal ah oo ku saabsan kaarka war-bixinta.
- **Waalidiinta** waa in ay yaqaanaan magaca macalinka iyo sida loola xariiri lahaa dugsiga (taleefoonka, email, ama balanka).
- **Macalimiinta iyo shaqaalaha dugsiga** waa in waalidiinta lala xariiraa lana siiyaa akhbaaraha ku saabsan horumarka ardayga.
- **Macalinka iyo waalidka** waa in ay ka doodaan horumarka iyo ardayga halka ku fiican yahay, kaliyah ma'aha dhicitaanka ama ku quseeyo. Waa in laga doodaa xeeladaha lagu hagaajinaayo ardayga.
- **Waalidiinta iyo ardayda** waa in ay ka doodaan si wadajir ah kaarka war-bixinta, dhibaatada ama xeeladaha hagaajinta ku haboon da'da ardayga.

Talooyin kale:

- _____
- _____

4. HEERARKA IMTIXAANADA

Heerka Imtixaanada iyo Qiimeynta

Dhamaan ardayda fasal kastaba waxaa la siinayaa imtixaanka lagu ogaanaayo waxa ay bartaan. Kana mid ah heerka imtixaanada ama qiimeynta la siiyo dhamaan ardayda gobolada ama dalka oo dhan. Dugsiyada qaarkood waxaa laga soo ururinayaa miidaalo ardayda taariikhdoda ah. Qiimeyntaa waxba ma yeelayso wax-tarka ardayga kaarka war-bixinta fasalada, waana arin aad u muhiim ah:

- Helitaanka waxay ardayda ay yaqaaniin iyo waxa ay u baahan yihiin in ay bartaano.
- Siinta waalidiinta, dugsiyada iyo hogaamiyaasha jaaliyada qaabka lagu ogaanaayo sidee ardayda iyo dugsiyada ay semeeyn iydoo laysku bar-bardhigaayo gobolada kale ama dalka.
- Go'aan gaarida dadaalka waxbarashado si haboon u shaqaynaayo iyo midka u baahan badalaada ama hagaajinta.

Qodbka qaranka No Child Left Behind Act (NCLB) waxaa looga baahan yahay dugsiga dadweynaha in ay isticmaalaano heerarka imtixaanka lagu qiyaaso ku guulaysiga aqoonta ardayda. Seattle, ardayda waxay qaadanayaa imtixaanka Washington Assessment of Student Learning (WASL) xiliga dayrta sanad kastaba laga bilaawo fasalka seddexaad ilaa fasalada dugsiga sare. Natiijada imtixaanka ardayga waxaa waalidka loogu dirayaa boostada.

Qiimeynta kale oo dugsiga isticmaalaan cabiraada horumarka kana mid ah:

- Dynamic Indicators of Basic Early Literacy Skills (**DIBELS**): xirfada qiimeeynta dugsiga hoose akhriska iyo qoritaanka.
- Washington Language Proficiency Test (**WLPT**): qalabka qiimeynta ardayda ku yar tahay xirfada Luqada Ingaliiska
- Developmental Reading Assessment (**DRA**)
- Direct Writing Assessment (**DWA**)
- Preliminary Scholastic Aptitude Test (**PSAT**): qiimeynta isku diyaarinta machadyada ardayda dugsiga sare

Qodobada Naseexada

- **Sdugsiga** akhbaargali waaildka qiimeynta jadwalka ardayga.
- **Waalidiinta** waa in ay ka cawinaan rdaya in aybdiyaar u noqdaan imtixaanka, nasasho ku filan helaano, nafaqo dhayli-tiran, iyo ay ky yimaadaan waqtiga loogu talagalay dugsiga.
- **Dugsiga** ugu dirida boostada dhibcaha imtixaanka WASL (iyo natiijada qiimeynta kale) waalidiinta. .
- **Dugsiga iyo kooxyaha jaaliyada** soo bandhiga carwooyinka cawinaayo waalidiinta sida ay ku fahmi lahaayeeyn qiimeynta.
- **Waalidiinta** natiijada qiimeynta imtixaanka muraajacad ku sameey isla markaana is –barbardhig natiijadii sanadkii hore. Haddii aad qabto wax su'aal ah ama arimo ku quseeyo la xariir macalimiinta, la-taliyaasha ama shaqaalaha kale dugsiga.
- **Waalidiinta** waa in aad ogaataa haddii ubadkaada dhibcaha maado kastaba in oo ku hooseeyey, dhex-dhexaad, ama sare, u bar-bardhig ardayda kale ay isku heerka fasalka ay yihiin.
- **Macalimiinta iyo waalidiinta** kala falanqoo qiimeynta natiijada imtixaanka shirka waalidka-macalinka ama shirarka kale shaqaalaha dugsiga. Waxaa la horumarinayaa xeelado gaar ah oo lagu hagaajinaayo waxbarashada ardayga.
- **Dugsiga, waalidiinta, iyo hogaamiyaasha jaaliyadaha.** Si wadajir ah muraajacad ugu sameeya macluumaadka imtixaanka.Waxay soo horumariyaa xalinta dhibaatada ka caawinaada ardayga iyo dugsiga sida u fulin lahaa horukac haboon.

Talooyin kale:

- _____
- _____

5. QORSHAHA WAXBARASHADA SHAQSI-AHAAN ARDAYDA

Ujeedooyinka Cilmiga

Arday kastaba waa in oo leeyahay ujeedooyin waxbarasho ku haboon da'diidsa oo la qaybsanaayo qoyska iyo dugsiga. Iyadoo la siinaayo hogaaminta iyo gargaarka, ardayga wuxuu gaarayaa in oo la kulmo ujeedooyinka cilmiga.

Cawinaada Dugsiyada, Qoysaska iyo Ururada Jaaliyada

Kaarka war-bixinta iyo qiimeynta waxay siinayaan akhbaaro muhiim ah oo hagaayo macalimiinta, qoysaska iyo ururada jaaliyada si ay ugu cawinaan ujeedada cilmiga. Cawinaada waxay noqon kartaa qaabab kala jaad ah. Arday kastaba iyo qoyska waa muhiim is ay siiyaano cawinaada ku haboon.

Waalidiinta waxay heli karaan cawinaada qorshaha waxabarashada ardayga si toos ah macalimiinta, la-taliyaasha, iyo shaqalaha kale dugsiga iyo ururada jaaliyada. Dugsiyada Dadweynaha Seattle , waalidiinta waxay xaq u leeyihiin in ay ka qaybgalaano dhamaan go'aanada la xariira ubadkooda.

Qodobada Naseexada

- **Macalimiinta** ka cawin ardayda iyo qoysaska sidee ay u sameeyn lahaayeen ujeedo cilmiga ardayga iyo ka cawinaada rajada sare ardayda.
- **Dugsiga** waa in sameeyaan shirka waalidka-macalinkaama shirarka kale oo waalidka ah oo lagu cawinaayo horumarka ardayga oo joogto ah iyo sheegitaan dhibaatada ama arimaha soo food-saaro.
- Gargaarida shaqaalaha dugsiga,**waalidka** in oo baaris ku sameeyo ikhtiyaarka dugsiga, barnaamijka dugsiga, ikhtiyaarka fasalka, iyo doorashada kale ee dugsiyada dadweynaha gudahooda si oo u go'aansado dugsiga ugu haboon ardayga.
- **Waalidiinta** waxay raadi karaan fursadaha ay qani ugu dhigi lahaayeen barnaamijka manhajka iyo howlaha waxbarashada jaaliyada sida ciyaaraha, farshaxanka, muusikada, iyo howlaha waxqabadka jaaliyada.
- **Shaqaalaha dugsiga iyo ururada jaaliyada** waxay kaa cawinayaan sida ay u aqoonsan lahaayeeyn fursadaha ay jaaliyada ugu gargaari karto ujeedada waxbarashada.
- **Dugsiyada, waalidiinta iyo ururada jaaliyada** waa in si wadajir ah u wada shaqeeyaan una hubin lahaayeen barnaamijyada gudaha iyo dibada dugsiga ardayda ugu fiican yihiin.
- **Waalidka, macalimiinta, la–taliyaasha iyo ururada jaaliyada** in ay si wadajir ah ugu diyaariyaan ardayda machadka iyo ikhtiyaark u raadinta waxbarashada ka sareeyso dugsiga sare.

Talooyin kale:

- _____
-

6. BARNAAMIJYADA IYO CAWINAADA ARDAYDA

Cawinaada iyo Waxbarashada Macalinka Gaarka ah

Ardayda waxaa u diyaar ah barnaamijyo kala nooc ah ee dugsiga dibadiisa, sabtiga iyi axada iyo xiliga kuleelaha. Dugsiyada, xarumaha jaaliyadaha, kaniisadaha iyo goobo kale waxaa laga bixiyaa waxbarshada macalinka gaarka ah iy barnaamijyo kale wax-tax u leh aqoonta ardayda.

Waaalidiinta waxay ubadkooda u heli karaan ikhtiyaar ayagoo la xariirayaan dugsiyada, ururada jaaliyadaha iyo waalidiinta kale. Barnaamijkyada waxaa loo dooranayaa iydoo sal-dhig looga dhigaayo baahida ardayga, xaq u yeelashada, deegaanka, qarashka, iyo qododa kale.

Qodobka qaranka ee No Child Left Behind (NCLB) Act waxaa dugsiyada looga baahan yahay in ay bixiyaano macalimiin waxabarsho gaar ah oo bilaash ah iyo cawinaad dheeraad ah caruurta u baahan hadii dugsiga u aqoonsado maamulka gobolka “hagaajinta u baahan ” seddex sano ama in ka badan. Waalidiinta waxay weydiisan karaa howlaha haddii dugsiga ardayga oo leeyahay lagu magacaabo (“Supplemental Educational Services”).

Kooxda Soo dhaxgalka Ardayga “Student Intervention Teams (SIT)” waxaa loogu talagalay in ay keenaano xalin ku haboon ardayga dhibaatada ka haysato fasalka. Kooxdaan waxaa ka qaybgalaayo ardayda, waalidiinta, macalimiinta, la-taliyaasha ama shaqaalaha kale dugsiga.

Qorshaha Waxbarashada Shaqsiyaadka “Individualized Education Plans (IEP)” waxaa loo abuuray ardayda u baahan cawinaada gaar ah waxbarida kuna adag tahay waxbarashada ama curyaan ah una baahan wax-baritaan ku haboom iyo barnaamij gaar ah. IEP waxaa loo sameeyey kooxyo waalidka-dugsiga kana mid noqon karo hay’adaha kale jaaliyada haddoo loo baahdo.

Qodobada Naseexada

- **Waalidiinta, shaqaalaha dugsiga iyo ururada jaaliyada** si ay si wadajir ah ula shaqayaan xalinta ku haboon ardayda u baahan howlaha u gaar ah.
- **Waalidiinta** waa in ay u soo sheegaan macalimiinta barnaamijyada waxbarashada ardayga ee ka qaybgalaano dugsiga dibadiisa.
- **Waalidiinta, shaqaalha dugsiga iyo bixiyaasha howlaha** waa in ay la xariiraan si joogto ah si loo hubiyo qof kastaba loo diggo sida ardayga u horumari lahaa ama haddoo loo baahdo badalaad.

Talooyin kale:

- _____
- _____

7. HAGAAJINTA DUGSIGA DEGMADDA

Sameeynta Wanaajinta Dugsiyada

Si loo hagaajiyo waxbarashada ubad kastaba, qaabka dugsiyada waa si joogto ah loo hagaajiyaa. Ardayda, waalidiinta, hogaamiyaasha jaaliyada iyo shaqaalaha dugsiga waa in si wadajir ah u wada shaqayaan dhibaatooyinka soo food-saaraayo, talooyinka dugsiga lagu hagaajinaayo, iyo kala qaybgalka xalinta dhibaatada sida ugu haboon dugsiga.

No Child Left Behind (NCLB) waxaa looga baahan yahay dugsiyada degmadda in ay la shaqayaan waalidka qorshaha hagaajinta dugsiga. Dugsiga degmadda waa in ay u sheegaan waalidka iyo jaaliyada daabacaa kaarka war-bixinta iyo sida dugsi kastabo oo yahay. Kaarka war-bixinta dugsiga waa in oo ku jiraa natiijada WASL dugsiga iyo akhbaaraha kale sida cadada ardayga macalinkiiba iyo nambarka boqolkiiba ka qalin-jabiyey dugsiga sare. Macluumaadkaan waxay naga cawinaysaa ogaashaha dugsiyada sida fiican u shaqaynaayo iyo dugsiyada u baahan hagaajinta.

Goorta waalidiinta, dugsiyada iyo ururada jaaliyada ay muraajacad ku sameeyaan macluumaadka iyo qorshaha hagaajinta dugsiga si wadajir ah, taas waxaa lagu hubinayaa ku guulaysiga ubad kastoo dugsiyada dhigto.

Qodobada Naseexada

- **Dugsiyada** iyo **waalidka** waa in ay aasaasaano ururka waalidka-macalinka “parent-teacher associations (PTAs) “ dugsi kastaba kana mid ahaashada qoysaska dugsiga. Waa in horumariyaan qodobada cawinaayo ardayda in ay ku guulaystaan waxbarashada.
- **Dugsiyada, waalidka** iyo **hogaamiyaasha jaaliyada** si wadajir ahaansho ugu qaybgalka shirarka muraajacada iyo dooda macluumaadka. Waa in ay cadeeyaan guulaysiga in oo ka cawino xalinta dhibaatooyinka.
- **Shaqaalaha Dugsiga** iyo **waalidka** waa in dugsiga soo horumariyaa qorshaha dib-u-habeeynta dugsi kastaba, sanad kastaba, iyo aqoonsiga ahmiyadaha qodobada sare iyo tilaabooyinka gaarka ah lagu hagaajinaayo dugsiga.
- **Shaqaalaha Dugsiga** iyo **waalidka** waa qayb ka mid ah go’aan gaarida dugsiga xaga isticmaalka lacagtiisa (miisaaniyada dugsiga).
- **Waalidka** waa in ay ka noqdaan qaybgalayaal fir-fircooni gudiyada iyo la-taliyaasha Dugiyada Dadweynaha Seattle arimaha kala jaadka ah gaadiidka iyo dhismayaasha sida loogu horumarin lahaa barnaamijkyo cusub iyo siyaasado wax-tar leh.
- **Waalidka** waa in ay yaqaanaan shirarka gudiga sare la qabanaayo. Codka waalidka iyo talooyinkooda ugu qaybgalka xalinta dhibaatada Dugsiyada Dadweynaha Seattle.
- **Ururada Jaaliyada** waxay la xariirayaan oo ay cadynayaan waxbarashada loo baahan yahay iyo fursadaha, iyadoo ay sal-dhig ugu dhigayaan shaqada ururka iyo goobaha ay ku takhasuseeyn. Waxaay cadeynayaa xalinta dhibaatada si wadajir ah waalidka iyo dugsiyadda.

Talooyin kale:

- _____
- _____

8. SU'AALADAHA IYO KHUSAYNTA

Wada-xariirinta

Xariirka wanaagsan oo ka dhaxeeyso waalidka, dugsiga iyo ururada jaaliyada waa qodob muhiim u ah oo gargaaraayo abuurida hab waxbarashada ardayda oo xoog leh. Cid kastaba waa in ay ka qaybgashaa habka waxbarashada lana qaybsataa isdhaafsiga akhbaaraha, weydiinta su'aaladaha iyo si wadajir ah u wada shaqaynta xalinta dhibaatooyinka si ugu faa'iidaystaan ardayda.

Qodobada Naseexada

- **Waalidiinta iyo macalimiinta** waa in ay kulmaan shaqsi ahaan, bilaawga sanad dugsiyeedka ee furitaanka dugsiya iyo hanuuninta, jadwalka shirarka guriga ama dugsiga, ama goobaha kale jaaliyada.
- **Dugsiyada** siinta fursadaha waalidiinta in ay la kulmaan maamulaha dugsiga bilaawga sanad dugsiyeedka.
- **Waalidiinta, shaqaalaha dugsiga ama shaqaalaha jaaliyada ururada** waa in ay balan horay ugu dhigtaan (haddii suurtagal tahay) goorta ay qabaano su'aalado ama wax khusayo horumarka waxbarashada ardayga si ay ugu falanqoodaan si wadajir ah.
- **Waalidiinta, shaqaalaha dugsiga ama shaqaalaha jaaliyada ururada** u ogolaaw shirarka in looga hadlo oo lays dhaqaystaa.
- **Dugsiyada** si taxadir ah u haynta sirta qarsoodiga ardayga iyadoo la raacaayo qodobka siyaasada gaarka ee Dugsiyada Dadweynha Seattle.
- **Waalidiinta, macalimiinta, iyo shaqaalaha** kale waa in ay isku dayaan xalinta jaawaab-celinta, khusaynta ka hor inta loo gudbin maamulaha
- **Waalidiinta** ama wakiilka **ururada jaaliyada** waxay la xariiri karaa haddii aan la xalin dhibaatada jawaab-celinta iyo wax-khusayo Hay'ada Howlaha Soo Dhaweynta ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle (206) 252-0010.

Talooyin kale:

- _____
- _____

KHAYRAADKA DHEERAADKA AH

Dugsiyada Dadweynhay Seattle ee Siyaasada Isbahaysiga Qoyska

"Siyaasada Gudiga Sare Dugsiyada waxay dhiiragaliyaan oo ay cawinaan ka qaybgalka waxbarashada qoyska, guriga iyo jaaliyadda iyo maamulka dugsiyada. Gudiga wuxuu aqoonsan yahay hab dhaqaneedka kala duwan qoyska, xaaladaha iyo hidaha taariikhda hore iyo ixtiraamka qoysaska go'aan gaarida waxbarashada ubadkooda waa nid aad u muhiim ah. Gudiga wuxuu balanqaaday in oo buuro oona fuliyo is-dhaxgalka dhaqanada iyo wax-tarka isbahaysiga dugsiga-qoyska Dugsiyada Degmadda iyo dugsi kastaba, waxayna aamisan yihiin isbahaysigain oo yahay qodob muhiim u ah ku guulaysiga waxbarashada ubad kastaba"

(Siyaasada Dugsiyada Dadweynha Seattle F05.00,
La qaatay,Agoosto 2004)

Siyaasada Gudiga Sare Dugsiga waxaa u dheeraad ah oo xiisaynayaa waalidka iyo jaaliyadaha ka qaybgalka waxbarashada waxaa ka mid ah:

- Wada-xariirka jaaliyada
- Gudiyada iyo La-Taliyaasha kooxyaha Mawaadinka
- Qaabka Gudiga La-Taliyaasha Mawaadinka
- Qaabka addeecsan Mawaadinimada
- Iskaashiga Jaaliyada
- Ururada Waalidka iyo Macalinka
- Ka qaybgalka Dadweynaha Shirarka Gudiga Sare Dugsiga
- Isticmaalka Iskaa-Wax U qabsashada
- Soo Booqashada Dugsiyada

Qodobka siyaasadaan iyo qodoba kale oo la xariira ardayda, dugsiyada iyo waxbarshada Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxaa ka fiirin karta Goobta Shabakada website (www.seattleschools.org) ama waxaa la soo xariiri kartaa xafiisyadda maamulka dhexe.

KHAYRAADKA DHEERAADKA AH

- La soo xariir deegaanka dugsigaada ama xafiiska maamulka dhaxe ee Dugsiyadda Dadweynaha:

  Seattle Public Schools
  John Stanford Center for Educational Excellence
  2445 3rd Avenue South
  PO Box 34165, Seattle, WA 98134
  (206) 252-0000
  www.seattleschools.org

- Maktabada Dadweynaha Seattle (goobaha Seattle oo dhan)
- Goobta shabakada "No Child Left Behind (www.nclb.gov)"
- Goobta shabakada "National Parent Teacher Association (www.pta.org)"
- Goobta shabakada "Community Training and Assistance Center (www.ctacusa.com)"

Talooyin Kale:

- _____
- _____

QORAALADDA

_____

_____

_____

_____

_____

_____

_____

_____

_____

_____

_____

_____

_____